

# TVÅ SPRÅK ELLER FLERA?

Råd till flerspråkiga familjer

# LABA AF AMA KA BADAN?

Talooyin ku socda  
qoysaska afaf badan ku hadla

Somalisk version

TVÅ SPRÅK ELLER FLERA? Råd till flerspråkiga familjer

Beställs från:  
Liber Distribution  
162 89 Stockholm  
e-post: skolutveckling@liber.se  
tel: 08-690 95 76  
fax: 08-690 95 50  
Best. nr: U04:048

Text: Språkforskningsinstitutet i Rinkeby  
© Myndigheten för skolutveckling 2004 (andra upplagan)  
Översättningar: Eqvator AB  
Foto: Ann Eriksson  
Produktion och grafisk form: Ord & Bildmakarna AB, Stockholm  
Tryck: Danagårds Grafiska, Ödeshög  
ISBN: 91-85128-93-7

## Innehåll

Tvåspråkighet – en värdefull resurs _____	2
Flerspråkiga familjer är olika _____	2
Kan barn lära sig två eller flera språk lika bra? _____	4
Vilket språk ska vi tala med vårt barn då vi föräldrar talar ett annat språk än svenska? _____	5
Vilket språk ska jag tala med barnet om vi föräldrar har olika modersmål? _____	6
Kommer mitt barn att lära sig svenska om jag fortsätter att tala mitt modersmål med barnet? _____	8
Är det dåligt om mitt barn blandar språken? _____	10
Vad ska jag göra om mitt barn bara svarar på svenska? _____	12
Vad kan jag göra för att stödja mitt barns utveckling i modersmålet? _____	14
Hur kan jag stödja mitt barns språkutveckling i svenska? _____	16
Vad ska jag göra om mitt barn slutar prata i förskolan? _____	18
Ska mitt barn ha modersmålsstöd i förskolan? _____	20
Ska mitt barn läsa ämnet modersmål i skolan? _____	22
Ska mitt barn läsa ämnet "Svenska som andraspråk" i skolan? _____	24
Några ordförklaringar _____	26
För vidare läsning och andra tips _____	28

## Tusmo

Laba af ku hadal – hanti dhaxalgal ah _____	3
Qoysaska afafka badan ku hadlaa waa kala geddisan yihiin _____	3
Ilmuhu hab wanaagsan oo isku mid ah ma u baran karaa laba af iyo ka badan? _____	4
Afkee ilmaha lagu la hadlaa kolka waalidku ku hadlaan af aan Iswiidhish ahayn? _____	5
Afkee ilmaha lagu la hadlaa kolka waalidku ku hadlaan afaf kala duwan? _____	6
Ilmaha afka hooyo lagu la hadlaa af-Iswiidhishka hab wanaagsan ma u baran doonaa? _____	8
Ma dhibaato ay keentaa haddii ilmuhu afaf kala duwan isku dhexqaso? _____	10
Maxaan sameeyaa kolka ilmuhu af Iswiidhish iigu jawaabo? _____	12
Maxaan waalid ahaan ka sameyn karaa horumarinta barashada afka hooyo ee ilmaha? _____	14
Sidee ayaan uga caawini karaa ilmaha horumarinta barashada af Iswiidhishka? _____	16
Maxaan sameeyaa haddii ilmuhu diido inuu hadlo kolka uu ku jiro dugsiga barbaarinta? _____	18
Ma in ilmaha laga kaalmeeyaa barashada afka hooyo kolka uu ku jiro dugsiga barbaarinta? _____	20
Ma in ilmuhu ku dhigtaa dugsiga maaddada afka hooyo? _____	22
Ma in ilmuhu uu dugsiga ku dhigtaa maaddada "Iswiidhishka af labaad ahaan"? _____	25
Erey-qeexid _____	27
Akhris dheeraad ah iyo talooyin dheeraad ah _____	28

# Tvåspråkighet – en värdefull resurs

De flesta människor i världen är två- eller flerspråkiga.

Två- och flerspråkighet är mycket värdefullt både för den enskilda människan och för samhället. Familjer som flyttat från ett land till ett annat har lättare att hålla kontakten med ursprungslandet om de bevarar sitt modersmål. Barnen i sådana familjer har större möjlighet att ta till sig föräldrarnas kulturarv om de kan föräldrarnas språk.

Den som är tvåspråkig kan också lättare förstå värdet av kulturell mångfald och kan där igenom få en rikare bild av världen.

Modersmålet betyder också mycket för kontakten i familjen och med släktingar, vilket hjälper barnet att känna sig säkrare i sin egen identitet och tillhörighet.

Alla barn kan lära sig två eller flera språk samtidigt, men det är inte så vanligt att man lär sig båda språken lika bra.

För att barnen ska kunna utveckla båda språken till en mycket hög nivå krävs att både hem, förskola och skola aktivt hjälps åt. Det är viktigt att de vuxna i barnens omgivning, på olika sätt, uppmuntrar och stöder användningen av minoritetsspråket. Genom att använda minoritetsspråket – inte bara i familjen, utan också på lekplatsen, i förskolan, i klassrummet och på arbetet – kan föräldrar och lärare konkret visa barnen att det är naturligt med flerspråkighet.

Tvåspråkigheten för med sig så mycket positivt att de flesta familjer som har två eller flera språk aldrig skulle kunna tänka sig att vara utan dem.

Den tvåspråkiga utvecklingen underlättas också om det övriga samhället är positivt till att människor talar flera språk.

## Flerspråkiga familjer är olika

Familjer kan vara två- eller flerspråkiga på många olika sätt. Båda föräldrarna kan ha ett gemensamt modersmål som är ett annat språk än svenska, t ex somaliska. En förälder kan ha sitt ursprung i ett land där man talar ett språk hemma och ett annat i skolan, t ex kurdiska hemma och turkiska i skolan. Föräldrarna kanske inte har samma modersmål, utan barnet får redan från början höra två eller tre språk hemma, t ex i en familj med en arabisktalande pappa och finsktalande mamma och kanske föräldrarna använder ytterligare ett annat språk för att tala med varandra, t ex engelska. Alla familjer består inte heller av ”mamma-pappa-barn,” utan också av äldre släktingar som har en aktiv roll i barnens fostran och som kanske också tillför ytterligare språk i barnets värld. Även ensamstående föräldrar kan ibland vilja satsa på tvåspråkighet.

# Laba af ku hadal – hanti dhaxalgal ah

Dadka dunida badankood waxay ku hadlaan laba af iyo ka badan.

Ku hadlidda laba af iyo ka badani waxaa weeye qiime dhaxalgal u ah qofka shakhsiga ah iyo bulshada guud. Qoysaska u guura dal kale waxay si fudud xiriir u la yelan karaa dalkoodii hooyo haddii ay doonayaan inay afkooda hooyo xoojiyaan. Carruurta ku korta qoysaskaas oo kale waxay fursad weyn u leeyihiin inay dhaxlaan dhaqanka qoyskooda haddii ay afka waalidkood bartaan..

Qofka ku hadla laba af wuxuu si fudud u fahmi karaa qiimaha dhaqamada kala oo isdhexgala iyo isagoo duniida aragti tayo badan u yeesha.

Afka hooyo wuxuu qiime weyn u leeyahay xiriirka xubnaha qoyska iyo qaraabada kale, taasoo ilmaha ka caawineysa inuu kalsooni weyn isku qaba qof ahaan iyo jinsi ahaanba.

Carruurto dhammi waxay isku mar baran karaa laba af iyo ka badan, laakiin badanaa ma dhacdo inay labada af isku si u bartaan.

Haddaba, si ilmuhu labada afba isku heer u barto waxaa lamahuraan ah in qoyska, dugsiga barbaarinta iyo dugsiga caadiga ahi is kaashadaan. Waxaa muhiim ah in dadka waaweyn oo uu ilmuhu la nool yahay ay siyaabo kala duwan ilmaha ugu dhiirrigeliyaan uguna kaalmeeyaan ku hadaalka afka dadka laga badan yahay.

Isticmaalka afka dadka laga badan yahay – oo lagu isticmaalo qoyska maahee, goobaha cayaaraha, dugsiyada barbaarinta, fasalada iyo goobaha shaqooyuinka – waxay waalidiinta iyo barayaashuba ilmaha tusayaan in ku hadalka afaf abadani ay tahay wax dabiici ah.

Waxaa hubaal ah in ku hadalka laba af ay waxtar weyn leedahay maadaama qoysaska ku hadla laba af iyo ka badan aysan marnaba dooneyn inay ka tanaasulaan ku hadalka afafkaas.

Horumarinta ku hadalka laba af waxaa fududeyn kara haddii bulshada inteeda kale ay wanaag u aragto dadka afafka badan ku hadla.

## Qoysaska afafka badan ku hadlaa waa kala geddisan yihiin

Siyaabo kala geddisan ayey qoysasku u noqon karaan kuwo ku hadla laba af ama ka badan. Labada waalid waxay noqon karaan kuwo hal af oo aan Iswiidhish ahaan wadaaga, sida af-Soomaali. Waalidka midkood wuxuu ka imaan karaa dal laga isticmaali laba af, af guriga lagu isticmaalo iyo mid dugsiyada, sida af\_kurdi oo guriga lagu isticmaalo iyo af-Turki oo dugsiyada lagu isticmaalo. Waxaa kaloo dhici kara in waalidiintu aysan isku af ahayn oo ilmuhu uu bilowga hore maqlo laba ama saddex af oo guriga looga hadlo, sida qoys aabbuhu ku hadlo af-Faransiis, hooyaduna af-Fiinish, labada waalidna ay isku la hadlaan af kale, sida af-Ingiriis. Qoysaskoo dhammi kama koobna oo qura ”hooyo-aabbe-carruur” ee waxaa weheliya ehel kale oo waayeel ah oo si toos ah uga qaybqaata korinta carruurta, kuna soo kordhiya af kale oo ilmuhu barto. Hal waalid oo keligii ilmooley ahi wuxuu mararka qaarkood dooran karaa in la kordhiyo ku hadalka laba af.

## Kan barn lära sig två eller flera språk lika bra?

Ja, men eftersom man ofta använder de olika språken i skilda sammanhang är det vanligt att tvåspråkiga barn klarar vissa ämnesområden och situationer bättre på det ena språket än på det andra. Barnet har kanske lättare att berätta på svenska vad som har hänt i skolan, medan det föredrar sitt modersmål för att tala om sådant som hör familjen till, t ex mat, kläder och släktingar. Barnet kanske använder sitt modersmål i samtal med äldre släktingar och föräldrar men växlar mellan de olika språken när det talar med syskon och kamrater. Sådana språkanvändningsmönster är naturliga för tvåspråkiga individer och brukar förändras under livets gång.

## Ilmuhu hab wanaagsan oo isku mid ah ma u baran karaa laba af iyo ka badan

Ha, laakiin maadaama afafka siyaabo kala geddisan loo isticmaalo, waxaa caadi ah ilmaha labada af ku hadlaa uu maaddooyinka iyo arrimaha qaarkood mid ku fiicnaado. Waxaa laga yaabaa ilmuhu doorbido inuu af-Iswiidhish ku hadlo kolka uu sheekeynayo wixii dugsiga ka dhacay, uuse doorbido afkiisa hooyo kolka uu ka hadlaayo waxyaalaha qoyska saameeya, sida cuntada, dharka iyo dadka qaraabada ah. Waxaa kaloo laga yaabaa in ilmuhu afka hooyo kula hadlo qaraabada waaweyn iyo waalidka, uuse isticmaalo afaf kala geddisan kolka uu la hadlayo walaalihiis iyo saaxiibadiis. Kuwaasina waxa weeye qaab luuqadeed oo lagu garto dadka laba af ku hadla, isbeddel ayaase ku dhaca inta qofku nool yahay.

Vilket språk ska vi tala med vårt barn då vi föräldrar talar ett annat språk än svenska?

Tala det språk ni behärskar bäst och som ni kan uttrycka er mer nyanserat på. För många är det modersmålet. Det är också lättare att uppfostra sina barn på ett språk som man bättre kan uttrycka sina känslor på. Många vuxna har också lättare att återge sagor och berättelser från sin egen barndom, sjunga sånger eller göra rim och ramsor tillsammans med barnet på det språk de själva talade som barn. Sådana aktiviteter betyder mycket inte bara för kontakten med barnet utan också för barnets allmänna språkutveckling.

Välj det språk som känns naturligast!

Afkee ilmaha lagu la hadlaa kolka waalidku ku hadlo af aan Iswiidhish ahayn?

Ku hadal afka aad aad ugu wanaagsan tahay oo aad si hufan wax ugu sharixi karto. Dadka badankood afkooda hooyo ayaa kaas u ah. Waxaa korinta carruurta u sahlan in lagu la hadlo af shucuurta si fudud loogu muujin karo. Dad badan oo waaweyn waxaa u fudud in ay sheekooyinka suugaanta iyo sheekaxariirooyinka ku sheegaan afkooda hooyo ama ay heeso iyo heeso-carruureed ku tebiyaan. Arrimahaasi waxay aad muhiim ugu yihiin xiriirka ilmaha ka sokow horumarinta barashada afka ilmaha.

Dooro afka aad isleedahay waa ugu habboon yahay!

## Vilket språk ska jag tala med barnet om vi föräldrar har olika modersmål?

Också i familjer där föräldrarna har olika modersmål brukar man rekommendera att var och en använder sitt modersmål tillsammans med barnet. Alltså: En person – ett språk. Barnet har då lättare att vänja sig vid att koppla ihop det ena språket med mamma och det andra med pappa. När hela familjen är tillsammans kan man välja det som känns naturligast; ett av modersmålen, svenska eller något annat gemensamt språk – eller att kombinera flera olika språk.

I familjer där den ena föräldern är svenskspråkig och den andra har ett annat modersmål är det också bra att varje förälder talar ”sitt” språk. Det är troligt att svenskan kommer att bli det dominerande språket i den här typen av familjer, men vill man att barnet ska bli tvåspråkigt är det viktigt att på olika sätt ge extra stöd för utvecklingen i minoritetsspråket.

## Afkee ilmaha lagu la hadlaa kolka waalidku ku hadlaan afaf kala duwan?

Waxaa lagu la taliyaa qoysaska ka kooban waalidiin ku kala afaf kala geddisan in mid waliba afkiisa ilmaha kula hadlo. Taas micneheedu waa: Hal qof – hal af. Waxaa kolkaa ilmaha u fududaaneysa inuu caadeysto inuu afna hooyo kula hadlo af kalena aabbe. Kolkase qoysku wada dhan yahay waxaa la dooran karaa afka ugu habboon; ha ahaado afka hooyo, kan Iswiidhishka ama af kaloo la wada isticmaalo – amaseba in afaf kala geddisan la wada isticmaalo.

Qoyskase ka koobaan laba waalid oo midkood af-Is-wiidhish ku hadlo kan kalen afkiisa hooyo, waxaa wanaagsan in mid waliba ilmaha kula hadlo afkiisa. Badanaaba af-Iswiidhishka ayaa ku xoog bata qoysaska noocaas ah, haddiise la doonayo in ilmuhu laba af ku hadlo, waxaa kolkaas lamahuraan ah in si dheeraad ah ilmaha looga caawino ku hadalka afka dadka yar.





## Kommer mitt barn att lära sig svenska om jag fortsätter att tala mitt modersmål med barnet?

Ja, det finns till och med forskning som visar att det går bättre att lära sig ett andraspråk om man samtidigt får en god grund i sitt förstaspråk. De båda språken behöver inte konkurrera, utan kan fungera som stöd för varandra. Om barnet har lärt sig ett begrepp på sitt modersmål (t ex gaajaysan på somaliska) är det lättare att lära sig ordet för motsvarande begrepp på svenska (hungrig) och omvänt.

Alla föräldrar önskar att det ska gå bra för deras barn i skolan och därför vill de att barnen tidigt ska lära sig svenska. Men detta betyder inte att föräldrarna ska sluta använda modersmålet när de talar med barnen. Däremot kan föräldrarna hjälpa barnen att få kontakt med det svenska språket. Det bästa sättet för barn att lära sig svenska är att de får använda det tillsammans med svensktalande kamrater och vuxna. Det vanligaste är att detta sker i förskolan och kanske med föräldrarnas vänner och bekanta.

## Haddaan ilmaha ku la hadlo afkayga hooyo hab wanaagsan ma u baran doonaa af Iswiidhishka?

Haayoo waxaa jira daraaso muujineysa in ilmuhu si wanaagsan u baran karo af labaad haddii kolka hore la xoojiyo afkiisa koowaad. Ma aha in labada af tartamaan ee waa in ay is kaamilaan. Haddii ilmuhu erey afkiisa hooyo ku barto (sida gaajaysan) waxaa u fududaaneysa inuu barto ereyga u dhigma oo af-Iswiidhishka ah (hungrig) ama sidaa cagsigeed.

Waalidiinta oo dhammi waxay jecel yihiin in ilmahoodu dugsiga ku wanaagsanaado, sidaas awgeed ayey waxay doonayaan in ilmuhu dhaqso u barto af-Iswiidhishka. Taas micneheeduse maaha in waalidku joojiyo inuu ilmaha kula hadlo afka hooyo. Hase ahaatee, waxay waalidku ilmaha ka caawini karaa inuu xiriir la yeesho af-Iswiidhishka. Habka ugu wanaagsan oo ilmuhu af-Iswiidhishka ku baran karo waxaa weeye inuu kula hadlo saaxiibadiisa iyo dadka kaloo waaweyn oo af-Iswiidhishka ku hadla. Sida caadiga ah waxay taasi ka dhacdaa dugsiyada barbaarinta iyo weliba saaxiibada iyo aqooninka waalidka.



## Är det dåligt om mitt barn blandar språken?

Nej, vanligtvis inte. Det är helt normalt att små barn blandar ord från de olika språken i ett och samma yttrande. Detta kan bero på att de ännu inte lärt sig att skilja mellan de olika språken eller på att de saknar ord på det ena eller andra språket.

En annan vanlig företeelse är den mer eller mindre medvetna växling mellan språken som äldre barn och vuxna kan göra, när de talar med andra tvåspråkiga. Denna så kallade kodväxling är något som är naturligt för tvåspråkiga. De utnyttjar helt enkelt möjligheten att växla språk som ytterligare ett uttrycksmedel, för att ex få fram en viss nyans eller känsla, citera vad någon exakt har sagt på ett annat språk eller för att skapa gemenskap mellan talare av samma språk. Många kan ha svårt att förstå eller acceptera ett sådant språkbruk. De kan tycka att det är dåligt att ”blanda” språken på det sättet och tro att det visar att man inte riktigt behärskar sina språk. Men forskningen visar att det krävs en ganska hög språkbehärskning för att kunna växla mellan språken på ett flytande sätt och att det är både naturligt och funktionellt i tvåspråkigas samtal.

## Ma dhibaataay keentaa haddii i Imuhuisku dhexqaso afaf kala duwan?

■ Maya sida badan. Waa wax caadi ah in carruurto isku qasaan erayo afaf kala geddisan kolka ay hadlayaan. Taasina waxay ku xiran tahay in aysan weli baran in ay kala saaraan afafka kala geddisan ama in ay eray ku garan waayaan af gaar ah.

Waxaa kaloo caadiyan dhaca in dhallinyarada iyo dadka waaweyni ay si ula kas ah isugu dhexqasaan afaf kala geddisan kolka ay la hadlayaan dad ku hadla laba af. Isku dhexqasidda afaf kala geddisani waa wax u caadi ah dadka laba af ku hadla. Waxay ka faa'iideysanayaan fursadda in ay isku dhexqasaan afafka si ay ugu adeegsadaan hab ay ku muujiyaan dhacdo ama shucuur, ama u tixraacaan oraah qof kale ku sheegay af kale ama ay u abuuraa xiriir wadajir oo la yeeshaan qofka ay la hadlayaan oo ay isku af yihiin. Dad badan ayey ku adag tahay in ay fahmaan ama aqbalaan in habkaa afafka loo isticmaalo. Waxay u arki karaan in ay wax xun tahay in afaka sidaa la isugu ”dhexqaso” ama ay u maleeyaan in uusan qofkaasi afafkisa si wanaagsan ugu hadlin. Laakiin cilmi-baaris la sameeyey waxay muujineysaa in dadka hab hannan wanaag ah isugu dhexqasa afafka ay astaan u tahay inay afafkaas aqoon weyn u leeyihiin, isla markaasna waa wax dhabiici iyo meelmar u ah dadka laba af ku hadla.



## Vad ska jag göra om mitt barn bara svarar på svenska?

Det är inte ovanligt att barn under vissa perioder föredrar att använda svenska, även om föräldrarna försöker vara konsekventa och tala sitt modersmål med dem. Om föräldrarna vill att barnet ska bli tvåspråkigt är det viktigt att de fortsätter att använda modersmålet tillsammans med barnet. Det är bra om det också finns jämnåriga kamrater och andra vuxna som använder minoritetsspråket med barnet så att språket fyller en funktion också utanför familjen. I många fall har det visat sig att även om barn inte aktivt använder språket i någon större utsträckning så kan de ändå utveckla en hög passiv förmåga, som grund för att senare lära sig att använda språket också mer aktivt.

Om barnet använder svenska när föräldrarna talar sitt modersmål kan dessa försöka hjälpa barnet genom att svara med de rätta orden och uttrycken på modersmålet. Kontakten och kommunikationen med barnet är emellertid det mest grundläggande, oavsett vilket språk man använder. Det är viktigare att lyssna på vad barnet har att säga, än till hur och vilket språk de väljer att göra det på. Det gäller att vara tålmodig, för det tar tid att överföra sitt språk till barnet i en miljö där svenskan har så stort inflytande och ofta värderas mer.

## Maxaan sameeyaa marka ilmuhu af Iswiidhish iigu jawaabo?

Ma aha wax aan caadi ahayn in carruurta mararka qaar kood doorbidaan inay ku hadlaan af-Iswiidhishka in kastoo ay waalidku isku dayaan inay si joogto ah ugu carruurta afkooda hooyo. Haddii waalidku ay doonayaan in ilmuhu noqdo mid laba af ku hadla, waxaa lamahuraan ah inay sii wadaa inay ilmaha kula hadlaan afka hooyo. Waxaa kaloo waxtar leh haddii ay jiraan saaxiibo ay ilmaha isku da' yihiin iyo dad kaloo waaweyn oo ilmaha kula hadla afka dadka laga badan yahay si uu afka u noqdo mid meelmar ah kolka uusan ilmuhu qoyska la joogin. Waxaa marar badan la muujiyey in haddii aysan carruurta afka wax badan isticmaalin ay dhalan karto in awooddooda waxfahamku isdhinto, taasoo asaas u noqota in ay mar dambe afka si firfircoon u isticmaalaan.

Haddii ilmuhu isticmaalo af-Iswiidhish kolka waalidku kula hadlaan afka hooyo, waxay waalidku isku talujin karaan in ay ilmaha ugu jawaabaan erayo iyo oraah sax ah oo afka hooyo ah. Xiriirka iyo iswareysiga ilmaha lala yeesho waa tiirka ugu muhiimsan, af kastoo lagu la hadlaba. Habka iyo afka ilmuhu jecel yahay inuu ku hadlo waxaa ka muhiimsan in la dhegeysto waxa uu sheegayo. Waxaa habbon in dulqaad loo yeesho waayo waqti ayey qaadaneysaa in afka hooyo la baro ilmaha ku nool deegaan af-Iswiidhishku ku leeyahay saameyn iyo qiimeyn weyn.



## Vad kan jag göra för att stödja mitt barns utveckling i modersmålet?

Turkiska barn i Turkiet och svenska barn i Sverige lär sig sitt modersmål i många olika situationer och med många olika människor; i familjen, tillsammans släkt och vänner, på gården, i affären, på bussen, i förskolan och i skolan. Hela dagen har de möjlighet att höra, tala och lära sitt modersmål. Många minoritetsbarn har mycket mer begränsade möjligheter för sin modersmålsutveckling. För flertalet är det framför allt i hemmet som barnet hör och använder modersmålet. Det ställer förstås större krav på föräldrarna att, tillsammans med förskolan och skolan, vidga barnens kontakter på modersmålet. Tillsammans måste de vuxna i barnens omgivning skapa möjligheter för barnen att få använda sitt modersmål så mycket som möjligt både i och utanför familjen, både tillsammans med jämnåriga och tillsammans med vuxna.

De allra flesta kommuner har verksamhet för föräldrar med hemmavarande barn i den s.k. öppna förskolan. Dit kan man gå för att träffa andra föräldrar och barn. I många kommuner erbjuder också biblioteken sagostunder på olika modersmål. Biblioteken har också barn- och ungdomsböcker på många olika språk att låna ut. Fråga i din kommun vilka möjligheter som finns där.

## Maxaan waalid ahaan ka sameyn karaa horumarinta barashada afka hooyo ee ilmaha?

Carruurta Turkiga iyo carruurta Iswiidhishku siyaabo kala duwan ayey afkooda hooyo u bartaan, dad badan oo kala duwan xiriir la leeyihiin; qoyska, qaraabada iyo saaxiibada, goobaha cayaarta, dukaamada, basaska, dugsiyada barbaarinta iyo dugsiyada caadig ah. Maalintoo dhan waxay fursad u helaan in ay maqlaan, ku hadlaan oo bartaan afkooda hooyo. Fursadaha carruurta dad badan oo laga badan yahay ay afkooda hooyo ku horumarin karaan waa mid xaddadan. Badankoodna waxay afka hooyo ku maqlaan kuna isticmaalaan guriga gudihiisa. Waxaa xaqiiqa in waalidka xil weyni ka saaran yahay sidii ay u ballaarin lahaayeen xiriirka uu ilmuhu afka hooyo u isticmaalo iyadoo la kaashanaya dugsiyada barbaarinta iyo kuwa caadiga ah. Iyadoo iskaashanaya waa ay in dadka waaweyni ilmaha u abuuraan fursado uu afkiisa hooyo sida ugu suurtagalka badan ugu isticmaalo guriga gudihiisa iyo debeddisaba, isagoo kula hadlaya carruurta ay isku da'da yihiin iyo dadka waaweynba.

Maamulada degmooyinka badankood waxay waalidka carrurta guriga ku haya u qabanqaabiyaan dhaqdhaqaaqyo ay ka mid yihiin dugsiyada furan ee barbaarinta. Halkaasna waxaa lagula kulmayaa waalid iyo carruur kale. Maktabadaha degmooyin badani waxay qabanqaabiyaan waqtiyo carruurta sheeka-xariirooyin loogu sheegayo afkooda hooyo. Waxaa kaloo maktabadaha la heli karaa oo la amaahan karaa buugta carruurta iyo dhallinyarada oo afafka badan ku qoran. La xiriir oo weyddii degmada aad ku nooshahay fursadaha halkaas ka jira.





## Hur kan jag stödja mitt barns språkutveckling i svenska?

En bra grund för barnets utveckling i svenska är ett gott samarbete mellan förskolan och skolan och föräldrarna. Förskolan och skolan har ett stort ansvar för barnens utveckling i svenska men föräldrarna kan också hjälpa till på olika sätt. Framför allt genom att uppmuntra barnens skolarbete på olika sätt. Också om föräldrarna inte kan så mycket svenska kan de hjälpa till med skolbarnens läsläsning.

Många föräldrar undrar hur deras barn kan lära sig svenska när barnen inte har några svenska kamrater att umgås med. Det finns minst två saker som föräldrar bör fundera på. För det första gäller det att på olika sätt skapa tillfällen för barnen att träffa personer som talar svenska. Det viktigaste är att barnet får många olika tillfällen att använda svenska tillsammans med kamrater och andra vuxna – det spelar mindre roll om dessa personer har svenska som modersmål eller inte. Föräldrarna kan t ex stimulera barnen att delta i aktiviteter där de kommer i kontakt med svensktalande barn såsom fotbollslag, körer, dansgrupper eller liknande.

För det andra gäller det att fundera på vilken förskola/skola som kan vara lämplig för barnet. Föräldrarna har rätt att ställa krav på att pedagogerna i såväl förskolan som skolan har en stor medvetenhet och kunnskap om tvåspråkig utveckling, andraspråksinlärning och hur man lär sig på ett andraspråk. Föräldrarna har också rätt att kräva att pedagogerna arbetar på ett sätt som gagnar deras barns språkutveckling, både på modersmålet och på svenska.

## Sidee ayaan uga caawini karaa ilmaha horumarinta barashada af Iswiidhishka?

Wadashaqayn wanaagsan oo dhexmarta waalidka iyo dugsiyada barbaarinta iyo dugsiyada caadiga ahi waxay asaas waxtar leh u tahay horumarinta afka Iswiidhishka ilmaha. Dugsiyada barbaarinta iyo kuwa caadiga ayaa xil weyni ka saaran yahay sidii ay u horumarin lahaayeen ku hadalka af-Iswiidhishka ilmaha, laakiin waalidkuna siyaabo kala duwan ayeey gacan uga geysan karaan. Waxyaalaha ay ku caawini karaa waxaa ka mid ah in ay ilmaha ku bogaadiyaan oo ku dhiirrigeliyaan inuu ka shaqeeyo casharada la soo siiyey. Xataa haddii aysan ay waalidku af-Iswiidhishka ku hadlin waxay ilmaha ka caawin karaan akhrinta casharada dugsiyada la soo siiyey.

Waalid badan ayaa waxay ka welwelaan sidii ilmaha af-Iswiidhishka ku baran lahaa mar haddii uusan lahayn saaxiibo Iswiidhish ah. Waxaase jira laba arrimood oo loo baahan yahay in waalidku madaxa ku hayo. Waa marka koowaade in ay abuuraan fursado uu ilmuhu kula kulmo dad af-Iswiidhishka ku hadla. Arrinta ugu muhiimsani waxaa weeye in ilmuhu helo fursado kala duwan oo uu af-Iswiidhishka kula hadlo saaxiibo iyo dad waaweyn – muhiim ma aha in dadkaas afkooda hooyo Iswiidhish yahay iyo in kale. Waalidku waxay tusaale ahaan ilmaha ku dhiirrigelin karaan inuu ka qaybqaato dhaqdhaqaaqyo uu kula kulmaayo carruur af-Iswiidhish ku hadla sida koox kubbadda cagta, koox heeso ama koox cayaaraha muusigga ama kuwo la mid ah.

Midda labaadna waa in waalidku ka fekeraa dugsiyada barbaarinta/caadiga oo ilmaha ku habboon. Waalidku waxay xaq u leeyihiin in ka dalbaan aqoonyahannada

barbaarinta iyo waxbarashada oo dugsiyada ka shaqeeya in ay ogaadaan oo aqoon u yeeshaan horumarinta ku hadalka laba af, barashada afka labaad iyo habka loo barto afka koowaad. Waxay kaloo waalidiintu ka dalbi

karaa aqoonyahannada barbaarinta iyo waxbarashada in ay u shaqeeyaan hab waxtar u leh horumarinta barashada ku hadalka afka ilmahooda, afka hooyo iyo kan Iswi-idhishkaba.

## Vad ska jag göra om mitt barn slutar prata i förskolan?

Vänta lite och se. Ibland när ett barn börjar i en förskola där modersmålet inte används, kan det hända att en så kallad "tyst period" inträffar och barnet inte säger någonting på svenska under lång tid. Det är ingen fara om barnet verkar må bra i övrigt och om det kommunicerar på annat sätt under den här tiden, t ex genom att peka, visa vad det vill och förstås fortsätter att tala sitt modersmål hemma. Hela tiden samlar barnet kunskap om det nya språket även om det inte märks utåt. Oftast börjar barnet tala efter en periods tystnad, då det samlat tillräckliga kunskaper om det nya språket. Små barn mår dock bra om de märker att även deras modersmål används och uppskattas i förskolan.

## Maxaan sameeyaa haddii ilmuhu diido inuu hadlo kolka uu ku jiro dugsiga barbaarinta?

Bal xoogaa sug. Kolka ilmuhu bilaabo dugsiga barbaarinta oo afkiisa hooyo laga isticmaalin, waxaa mar-mar dhacda wax loo yaqaan "xilliga aamusnaanta", kolkaasoo uusan ilmuhu waqti dheer ku hadlin afka Iswi-idhishka. Taasi wax dhibaato ma leh mar haddii uu ilmuhu sidiisa kale u caafimaadqabo ama siyaabo kale dadka ula xiriiraayo, sida inuu farta ku fiiqo wixii uu rabo, uuna ku hadlo afkiisa hooyo goorta guriga joogo. Ilmuhu mar walba si aan kor laga dareemeyn ayuu afka cusub uga ururinayaa aqoon. Xilliga aamusnaanta kadib ilmuhu wuxuu afka cusub ka ururiyey aqoon ku filan, wuxuuna bilaabaa inuu hadlo. Carruurta yaryarise wax-ay ku farxaan oo la qabsadaan marka ay arkaan in afko-oda hooyo looga hadlayo oo laga qiimeynayo dugsiga barbaarinta.



## Ska mitt barn ha modersmålsstöd i förskolan?

För att klara skolan och få en bra framtid i Sverige är naturligtvis goda kunskaper i svenska av avgörande betydelse. Men inläringen av svenska behöver inte ske på modersmålet bekostnad. Forskningen har visat att det snarare är tvärtom; barn som får möjlighet att utveckla sitt modersmål i förskolan och skolan får också ofta bättre kunskaper i svenska och i andra skolämnen. Modersmålsstödet i förskolan kan fungera som en bro mellan hemmet och förskolan. Det ger också barnet en värdefull möjlighet att vidareutveckla sitt modersmål samtidigt som barnet utvecklar svenska som ett andraspråk.

Det är ganska vanligt att barn som har ett annat modersmål kommer i kontakt med svenskan först i förskolan. Ibland kan det finnas tvåspråkiga förskolor eller tvåspråkiga avdelningar för barn med samma modersmål. Där finns det både svenskspråkig personal och personal som talar barnets modersmål. Föräldrarna bestämmer själva om de vill ha sina barn på en sådan förskola.

Om barnet går i svensktalande grupp kan föräldrarna ansöka om modersmålsstöd. Då kommer en modersmålstränare (som förut kallades hemspråkstränare) till förskolan och pratar, leker och läser sagor med barnet på modersmålet. Fråga din förskola eller ansvarig tjänsteman i din kommun om vilka möjligeter som erbjuds.

## Ma in ilmaha laga kaalmeeyaa barashada afka hooyo kolka uu ku jiro dugsiga barbaarinta?

Aqoon loo yeeshaa af-Iswiidhishku waxay muhiim weyn u tahay sidii natiijo waxbarashada looga gaari lahaa, aayo wanaagsan Iswiidhan looga samaysan lahaa. Laakiin barashada af-Iswiidhishku waa in aysan waxyeelleyn barashada afka hooyo. Cilmi-baaristu waxay muujineysaa; in ilmaha fursad u hela inuu dugsiga barbaarinta iyo kan caadiga ah ku horumariyo afkiisa hooyo uu aqoon ka sarreysa u yeesho af-Iswiidhishka iyo maaddooyinka kaloo dugsiga lagu dhigo. Kaalmada afka hooyo ee dugsiga barbaarintu waa kaabad isku xirta guriga iyo dugsiga barbaarinta. Waxay kaloo ilmaha fursad qiime badan u siisaa inuu sii horumariyo afkiisa hooyo isagoo isla markaasna af-Iswiidhishka u horumarinaya sidii afkiisa labaad.

Waa wax caadi ah in carruurta af kale ku hadashaa ay xiriir af-Iswiidhishka kala kulmaan dugsiga barbaarinta. Waxaa jira dugsiiyo barbaarin oo laba af lagu dhigo iyo kuwo ay jiraan qaybo laba af lagu dhigo oo loogu taagalay carruurta isku afka ah. Halkaasna waxaa ka shaqeeya dad ku hadla af-Iswiidhish iyo kuwo ku hadla afka hooyo ee carruurta. Waalidka ayaana go'aan ka gaaraya haddii doonayaan in ilmahoodu dhigto dugsiga barbaarinta oo labada af looga hadlo.

Haddiise ilmuhu dhigto qayb Iswiidhish qura looga hadlo, waxay waalidku codsan karaan in ilmaha laga caawino barashada afka hooyo. Kolkaas waxaa dugsiga imanaya tababare afka hooyo (oo horey loogu yaqaaney tababaraha afka guriga), kaasoo ilmaha la sheekeysana-

aya, la cayaaraya uguna akhrinaya sheeka-carruureed afkooda hooyo. Haddaba, la xiriir oo weyddii dugsiga barbaarinta ama Maamulka Arrimaha Bulshada fursadaha ka jira xaafadda ama degmada.

## Ska mitt barn läsa ämnet modersmål i skolan?

Forskning visar att tvåspråkiga barn som lärt sig läsa och skriva på sitt modersmål har lättare att utveckla och bevara det. Det bästa vore om alla barn först fick lära sig att läsa och skriva på sitt starkaste språk, som för många barn är modersmålet. Förmågan att läsa och skriva på ett språk underlättar sedan läsinläringen på andra språk. Barn kan även lära sig läsa och skriva samtidigt på flera språk. I skolans modersmålsundervisning får barnet möjlighet att lära sig läsa och skriva på sitt modersmål. Genom att till exempel skriva brev, läsa böcker och annat skrivet material kan barnet fortsätta och utöka kontakten med ursprungslandet.

I skolan har barnet rätt till undervisning i modersmålet. Det måste finnas minst fem barn i kommunen för att bilda en grupp för modersmålsundervisning (tidigare kallad hemspråksundervisning). Om barn med samma språk går i olika skolor, samlar man dem på en skola under de timmar som modersmålsundervisningen sker. Undervisningen är frivillig och därför måste föräldrarna anmäla till skolan om de vill att barnet ska ha modersmålsundervisning. Om barnet inte kan så mycket svenska, har barnet också rätt att få studiehjälp på modersmålet. Det betyder att barnet får hjälp av en modersmåls lärare i olika skolämnen. Läraren förklarar på modersmålet innehållet i det som klassen arbetar med och hjälper barnet i skolarbetet. Skolan bestämmer om barnet ska få studiehjälp.

Det finns också andra sätt att studera modersmålet. Fråga din skola vilka möjligheter som erbjuds och vad de innebär. För några språkgrupper och på några orter finns det t.ex. möjlighet att välja tvåspråkig undervisning i form av tvåspråkiga klasser eller språkligt inriktad friskola.

## Ma in ilmuhu ku dhigtaa dugsiga maaddada afka hooyo?

Cilmi-baaris ayaa waxay muujineysaa in carruurta hab wanaagsan u baratay akhriska iyo qorista afka hooyo ay u fududahay in ay afkooda horumariyaan oo xafidaan. Waxaa wanaagsanaan lahayd in carruurta marka hore barato akhriska qorista afkooda koowaad oo carruurta badankood u la mid ah afkooda hooyo. Awoodda akhriska iyo qorista afka hooyo waxay fududeysaa barashada afafka kale. Carruurta waxay isku mar baran karaan akhriska iyo qorista afaf badan. In carruurta lagu baro afkooda hooyo dugsiyada waxay fursad u siisaa in ay bartaa akhriska iyo qoriska afkooda hooyo. Waxay carruurta xiriir dheer kula yeelan kartaa dalkoodii hooyo iyadoo qora warqado, akhriya buug iyo qoraalo kale.

Carruurta dugsiyada dhigataa waxay xaq u leeyihiin in la baro afkooda hooyo. Degmo walbana waa inay ka jiraan ugu yaraan shan carruur ah oo isku af ah si loo bilaabo duruusta afka hooyo ( oo horey loogu yaqaaney barashada afka guriga) Haddii carruurta ay kala dhigtaan dugsiyada kala duwan waxaa xiisadaha barashada afka hooyo la isugu keenayaa hal dugsi. Waxbarashadu waa mid ikhtiyaari ah, sidaas awgeed waa inay waalidku dugsiga ku wargeliyaan inay doonayaan in ilmahooda loo dhigo xiisado afka hooyo ah. Haddii uusan ilmuhu ku hadlin af-Iswiidhishka, wuxuu kolkaas xaq u leeyahay in gargaarka waxbarashada lagu siiyo afkiisa hooyo. Taas micneheedu waxa weeye in bare afka hooyo uu ilmaha ka caawinaayo maaddooyinka dugsiga lagu dhigo. Baruhu wuxuu ilmaha afka hooyo ugu sharaxayaa maaddooyinka dugsiga lagu



dhigo iyo waxa ay ka kooban yihiin. Dugsiga ayaana go'aan ka gaaraya in ilmaha la siiyo gargaar waxbarasho iyo in kale.

Waxaa dugsiga ka jira habab kale oo afka hooyo lagu baran karo. La xiriir oo weyddii dugsiga fursadaha jiraa

iyo waxa ay kala yihiin. Kooxaha qaarkood iyo degmooyinka dhawr ah waxaa ka jira fursado lagu dooran karo waxbarasho laba af lagu dhigo oo ka kooban fasallo laba af ku socda ama dugsi barbaarin oo xoogga afka la saaray.

# Ska mitt barn läsa ämnet "Svenska som andraspråk" i skolan?

I skolan kan man studera svenska antingen inom ämnet "Svenska" eller inom ämnet "Svenska som andraspråk". Vilket av dessa ämnen som ditt barn bör läsa beror på vilka färdigheter i svenska som barnet har när det börjar skolan. Barn med ett annat modersmål än svenska har ju oftast inte hunnit lära sig lika mycket svenska som svensktalande barn när de börjar skolan. Då är det viktigt att barnet får en språkundervisning som utgår från just detta barns kunskaper och behov. Om barnet inte får bra hjälp att hämta in det språkliga försprång som de svensktalande barnen har, finns det risk att barnet får svårt att komma ikapp de andra. Och det kan påverka hur man klarar sig i de andra ämnena i skolan.

Målet för ämnet "Svenska som andraspråk" är att eleverna ska uppnå samma nivå i svenska som elever med svenska som modersmål. Läraren i "Svenska som andraspråk" vet vad som kan vara svårt för elever som inte har svenska som modersmål. Därför kan läraren anpassa undervisningen mer efter de enskilda elevernas kunskaper och behov. Undervisningen i "Svenska som andraspråk" ska göra det möjligt för eleverna att använda svenskan som ett redskap för att tänka och för att uttrycka sig i tal och i skrift. Eleven ska också, vid sidan av modersmålet, kunna använda svenska språket som ett effektivt redskap för att inhämta kunskaper i andra ämnen.

Ofta bedrivs undervisningen i "Svenska som andraspråk" i mindre grupper. Det ger eleverna bättre möjligheter att öva språket och läraren har mer tid och utrymme för varje elev. Till skillnad från undervisningen i en

stor klass kan eleverna här oftare få komma till tals. I en mindre grupp är det också lättare att våga fråga och be läraren om hjälp när man inte förstår eller har svårt att hitta de rätta orden och uttryckssätten.

Fråga på ditt barns skola hur de bedriver undervisningen för tvåspråkiga elever både i ämnet "Svenska som andraspråk" och i skolans övriga ämnen.

# Ma in ilmuhu uu dugsiga ku dhigtaa maaddada "Iswiidhishka af labaad ahaan?"

Dugsiyada waxaa loogu baran karaa af-Iswiidhishka maaddo "Iswiidhish" ama maaddo "Iswiidhish af labaad ahaan". Midda ilmahaagu baranayaa waxay ku xiran tahay sida uu af-Iswiidhishka ku yahay kolka uu dugsiga bilaabay. Carruurta ku hadasha af hooyo oo aan Iswiidhish ahayn si wanaagsan oo la mid ah sida kuwo Iswiidhishka ku hadla uma yaqaaniin kolka ay dugsiga bilaabaya. Sidaas awgeed, waxaa habboon in ilmaha la siiyo waxbarasho afka hooyo oo ku salaysan aqoonta iyo baahida ilmaha. Haddii aan ilmaha caawimaad uu ilmaha af-Iswiidhishka ku hadla la mid ah la siin, waxaa khatar noqoneysa inuu ilmuhu soo gaari waayo carruurta kale. Taasina waxay saameyn weyn sidii uu uga soo bixi lahaa maaddooyinka kale oo dugsiga lagu dhigo.

Ujeeddada laga leeyahay maadada "Iswiidhishka af labaad ahaan" waxa weeye in ilmaha la siiti aqoon uu ku soo gaaro carruurta kale oo Iswiidhishku afkooda hooyo yahay. Baraha maaddada "Iswiidhishka af labaad ahaan" wuxuu aqoon u leeyahay waxyaalaha ku adag carruurta uusan Iswiidhishku afkooda hooyo ahayn. Sidaas awgeed, wuxuu baruhi isku taxalujiyaa inuu waxbarashada ka dhigo mid ku salaysan aqoonta iyo baahida ilmaha. Barashada "Iswiidhishka af labaad ahaan" waxay carruurta fursad u siineysaa in ay af-Iswiidhishka u adeegsadaan aalad ay ku fekeraan, waxna ku akhristaan kuna qoraan. Ardaygu waa inuu afka hooyo ka sokow awood u yeesha inuu af-Iswiidhishka u isticmaalo aalad uu aqoon uga soo urursado maaddooyinka kale.

Badanaaba waxaa waxbarashada "Iswiidhishka af labaad ahaan" la siiyaa koox arday ah oo aan badnayn. Taasina waxay ardayda fursad u siisaa inay bartaan afka, iyo inuu baruhi arday walbaba u helo waqti uu ku caawino. Fasalkaas ardayda yari wuxuu fududeeyaa in arday waliba fursad u helo inuu hadlo. Haddii ardayda farsalku yar tahay, wuxuu arday waliba ku dhiirran karaan inuu baraha wax su'aalo caawimaadna ka weyddiisto erayada iyo oraaqaha ku adag.

La xiriir oo weyddii dugsiga ilmahaagu dhigto sida ay socoto waxbarashada maaddada "Iswiidhishka af labaad ahaan" iyo maaddooyinka kale ardayda labada af ku hadasha loo dhigo.

## Några ordförklaringar

**Andraspråk:** Det eller de språk som börjar läras in efter förstaspråket. Det är inte alltid lätt att dra gränsen mellan förstaspråk och andraspråk. När det gäller ett barn som börjar lära sig ytterligare ett språk i mycket tidig ålder kan man säga att barnet har två förstaspråk.

**Förstaspråk:** Det eller de språk som ett barn börjar lära sig först.

**Hemspråk:** Begreppet “hemspråk” uppkom i samband med den så kallade hemspråksreformen som började genomföras 1977. Hemspråksundervisning kallas numera modersmålsundervisning. Barn har rätt till modersmålsundervisning om någon av föräldrarna eller vårdnadshavarna har ett annat språk än svenska som modersmål och om man använder språket dagligen med barnet.

**Majoritetsspråk:** Det största och dominerande språket i landet. I Sverige är svenska majoritetsspråket.

**Minoritetsspråk:** De språk som talas av delar av befolkningen. I Sverige finns fem officiella inhemska minoritetsspråk, *finska, jiddisch, meänkieli, romani chib* och *samiska* och ett mycket stort antal språk som talas av nytillkomna minoriteter, t ex *arabiska, danska, kurdiska, persiska, turkiska* och *somaliska*.

**Modersmål:** Termen “modersmål” är ett mångtydigt begrepp, men vanligtvis menar man det/de första språk som lärs in i hemmet.

**Tvaspråkighet:** Termen “tvaspråkighet” används ofta som samlingsterm för “två- eller flerspråkighet”.

# Erey-qeexid

**Afka labaad:** Afka ama afafka kale oo la barto afka koo-waad kadib. Waxaa badanaaba adag in la kala saaro afka koowaad iyo afka labaad. Ilmahase af kale barta isaga oo dhllaan ah, waxaa la oran karaa inuu leeyhaya laba af oo koowaad.

**Afka koowaad:** Afka ama afafka ilmuhu marka ugu horreysa barto.

**Afka guriga:** Halkudhegga "afka gurigu" wuxuu la soo baxay dibuhabayntii afka hooyo oo la sameeyey sannadkii 1977. Haddase waxaa loo beddelay bwaxbarashada afka hooyo. Dhammaan carruurta xaq ayey u leedahay in la siiyo waxbarasho afka hooyo marka laba waalid midkood uu af aan Iswiidhish ahayn ilmaha kula hadlo guriga.

**Afka dadka badan:** Waa afka ugu weyn oo dal looga hadlo waxna lagu qoro. Iswiidhan waxaa afka dadka badan ah af-Iswiidhishka.

**Afka dadka laga badan yahay:** waa afafka ay ku hadlaan qaybo ka tirsan bulsho weynta. Iswiidhan waxaa afafka dadka laga badan yahay loo aqoon yahay afafkaan: *af-Fiinish, af-Jiddish, af-Meänkieli, af-af-Romani chib* iyo *af-Saami* iyo afaf cusub oo ay ka mid yihiin *af-Carabi, af-Daanish, af-Kurdi, af-Beershi, af-Turki* iyo *af-Soomaali*.

**Afka hooyo:** Micnaha "afka hooyo" waa mid ujeedo badan waxaase looga jeedaa afka ama afafka marka ugu horreysa guriga lagu barto.

**Laba af ku hadalka:** Micnaha "laba af ku hadalka" waxaa loo isticmaalaa kolka laga hadlayo ku hadalka "laba af ama ka badan".

## För vidare läsning

Arnberg, Lenore (1988), *Så blir barn tvåspråkiga. Vägledning och råd under förskoleåldern*. Stockholm: Wahlström & Widstrand. (Boken finns också översatt till arabiska, engelska, finska och spanska.)

Baker, Colin (1996), *Barnets väg till tvåspråkighet: råd till föräldrar och lärare i förskola och grundskola*. Uppsala: Påfågeln.

Häkansson, Gisela (2003), *Tvåspråkighet hos barn i Sverige*. Studentlitteratur

Hyltenstam, Kenneth (red.) (1996), *Tvåspråkighet med förhinder? Invandrar- och minoritetsundervisning i Sverige*. Lund: Studentlitteratur.

Hyltenstam, Kenneth (red.) (1999), *Sveriges sju inhemska språk – ett minoritetsperspektiv*. Lund: Studentlitteratur.

Lightbown, Patsy and Spada, Nina (2003), *How Languages are Learned*. Oxford University Press. Revised edition.

## Andra tips

För den som har tillgång till Internet (finns bl.a. på alla bibliotek) finns mycket information att hämta om tvåspråkighet i familjen och i skolan.

Om modersmålsundervisningen i förskolan och skolan kan man läsa på Tema Modersmål som ligger på Skoldatanätet. Där finns också särskild information riktad till föräldrar och till barn.

<http://www.skolutveckling.se/mangfald>

Mer information om svenska som andraspråk finner man bl.a. på Nationellt centrum hemsida:

<http://www.lhs.se/sfi>

## Akhris dheeraad ah

Arnberg, Lenore (1988), *Så blir barn tvåspråkiga. Vägledning och råd under förskoleåldern*. Stockholm: Wahlström & Widstrand. (Buuggaan waxaa lagu turjumay af-Carabi, af-Ingiriis, af-Fiinish iyo af-Isbaanish.)

Baker, Colin (1996), *Barnets väg till tvåspråkighet: råd till föräldrar och lärare i förskola och grundskola*. Uppsala: Påfågeln.

Häkansson, Gisela (2003), *Tvåspråkighet hos barn i Sverige*. Studentlitteratur

Hyltenstam, Kenneth (red.) (1996), *Tvåspråkighet med förhinder? Invandrar- och minoritetsundervisning i Sverige*. Lund: Studentlitteratur.

Hyltenstam, Kenneth (red.) (1999), *Sveriges sju inhemska språk – ett minoritetsperspektiv*. Lund: Studentlitteratur.

Lightbown, Patsy and Spada, Nina (2003), *How Languages are Learned*. Oxford University Press. Revised edition.

## Talooyin dheeraad ah

Dadka heli kara Internet (waxaa laga helaa maktabadaha oo dhan) waxay heli karaan warbixino ku saabsan ku hadalka laba af oo looga hadlo guriga iyo dugsiyada.

Warbixino ku saabsan barashada afka hooyo oo laga dhigo dugsiyada barbaarinta iyo kuwa caadiga ah waxaa laga akhrisan karaa Tema Modersmål (Halkudhegga Afka Hooyo) oo laga helo Skoldatanätet (bogga Internet ee Hay'adda Waxbarashada). Halkaasna waxaa ku qoran warbixino khaas ah oo loogu talagalay waalidka iyo carruurta.

<http://www.skolutveckling.se/mangfald>

Warbixin dheeraad ah oo ku saabsan Iswiidhishka af labaad ahaan waxaa laga heli karaa bogga Internet-ka ee Xarunta Qaranka: <http://www.lhs.se/sfi>

Innehåll och utformning  
av denna broschyr  
har utarbetats av  
Språkforskningsinstitutet i Rinkeby  
i samarbete  
med föräldrar, förskollärare och lärare  
och med forskare vid  
Centrum för tvåspråkighetsforskning,  
Stockholms universitet.

Institutet tackar dem alla varmt  
för värdefulla synpunkter!

Myndighetn för skolutveckling har bekostat  
översättning och tryckning.

Tusmada iyo qaabka  
buuggaan waxaa soo saaray  
Språkforskningsinstitutet i Rinkeby  
Kadib wadashaqayn uu la yeeshay  
waalidiinta, barayaasha dugsiyada barbaarinta  
iyo barayaasha caadiga ah  
iyo weliba aqoonyahanno ka socda  
Centrum för tvåspråkighetsforskning,  
Stockholms universitet.

Machadku wuxuu si diirran ugu  
mahadnaqayaa dhammaan dadkii  
talooyinka dhaxalgalka soo gudbiyey!

Myndigheten för skolutveckling ayaa  
bixiyey kharashka turjumidda iyo daabicaadda.

# TVÅ SPRÅK ELLER FLERA?

## Råd till flerspråkiga familjer

De råd som ges i den här broschyren grundar sig på aktuell kunskap om barns tvåspråkiga utveckling och bygger på de senaste forskningsrönen, förslag och synpunkter från föräldrar, pedagoger i förskola och skola och från forskare vid andra institutioner.

Råden är allmänna och passar många men kanske inte alla. Givetvis ska varje förälder välja det som känns naturligt och bäst i den egna familjen.

Broschyren är tvåspråkig och ges ut på svenska samt albanska, arabiska, bosniska, engelska, finska, somaliska, spanska, turkiska, kurmanji (nordkurdiska), arli (romani) och lovari (romani).

## LABA AF AMA KA BADAN?

Talooyin ku socda qoysaska afaf badan ku hadla

Talooyinka qoraalkani waxay ku dhisan yihiin aqoon cusub oo loo yeeshay horumarinta barashada laba af ee carruurta oo ku salaysan cilmi-baarisyadii ugu dambeeyey iyo talooyin iyo ra'yiyo laga soo ururiyey waalidiinta, aqoonyahannada barbaarinta iyo waxbarashada ee dugsiyada iyo aqoonyahanno ka socda machadyo.

Talooyinkan waa kuwa guud oo dad badan ku habboon laakiin laga yaabo in aysan dadkoo dhan ku habbooneyn. Waalid walibase wuxuu xaq u leeyahay inuu doorto habka dabiiciga ah oo ku habboon qoyska.

Bugyarahaani waa laba-afle oo wuxuu ku qoran yahay af Iswiidhish iyo afafka ay ka mid yihiin af-Albaan, Carabi, af-Bosni, af-Ingiriis, af-Fiinish, af-Soomaali, af-Isbaanish iyo af-Turki.



MYNDIGHETEN FÖR  
SKOLUTVECKLING



SPRÅKFORSKNINGS-  
INSTITUTET i Rinkeby

